Somali Public Agenda

Faallo Kooban 15

Nofeembar 2021

Soo koobid

Kadib ku dhawaad muddo afar bil iyo bar ah, doorashada 54-ta xubnood ee Aqalka Sare ayaa lasoo dhammeystiray. Hase ahaatee, hannaanka doorashadda kama marneyn cillado. Waxa uu hannanaka doorashada awood siiyay madaxda Dowlad-Goboleedyada, kuwaasoo baarlamaanka gudbinayay liiska musharraxiinta ku tartamayay kursi walba oo Aqalka Sare kamid ah, kadibna ay kala dooranayeen baarlamaannada dolwad-goboleedyada (Soomaaliland booska baarlamanka waxaa ugu jiray 46 xubnood). Inta badan kuraasta, liiska musharraxiinta iyo hannaanka doorashadda waxaa si buuxda gacanta ugu hayay madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada, taasoo sababtay musharraxiin badan in si kutalagal ah looga reebay liiska doorashadda. Waxaa sidoo kale kaalin weyn ku lahaa natiijada doorashadda musharraxiinta xiriirka ay la lahaayeen kooxaha siyaasadda isku haya. Sidaas oo ay tahay, haweenka waxa ay heleen ku dhowaad 26% xubnihii la doortay doorashooyinka Aqalka Sare, taasoo ah natiijo togan. Faalladan koban waxa aan ku eegeynaa sida xubnaha Aqalka Sare ee 54-ta ah loo doortay, sidoo kale casharadda muhiimka ah ee laga baran karo doorshadan iyo sida loogu dabaqi karo doorashada soo aaddan ee Golaha Shacabka oo ka kooban 275 xubnood.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay ’ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay’adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2021 Somali Public Agenda

Casharadda laga bartay Doorashooyinka Aqalka Sare ee Soomaaliya

Hordhac

Doorashooyinka Aqlaka Sare ee Soomaaliya waxaa lasoo gabagabeeyay 13-ka Nofeembar 2021-ka. Xubnaha 54-ta ah waxa ay Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ku mataalaan Dowlad-Goboleedyada. Maadaama aysan jirin codeyn dadweyne oo toos ah, xubnaha Aqalka Sare waxaa soo doortay baarlamaannadda dowlad-goboleedyada si lamid ah doorashaddii 2016-ka. Madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada ayaa liis musharraxiin ah oo ku tartamaya kursi walba u gudbinayay baarlamaannada dowlad-goboleedyada.

Hannaanka doorashadda xubnaha Aqalka Sare ayaa illaa xad ahaa mid cad, ugu yaraan marka la barbardhigo habka doorashadda xubnaha 275-ta ah ee Golaha Shacabka, kaasoo aan weli ka billaaban goobihii loo madlay, marka laga reebo labo kursi oo Soomaaliland ah oo Muqdisho lagu doortay 1-dii Nofeembar 2021. Sikastaba, doorashadu waxa ay qaadatay muddo ka badan intii la saadaalinayay, iyadoo doorashada Aqalka Sare markii hore loo qorsheeyay in ay qaadato maalmo kooban. Afartii xubnood ee ugu horreeyay ee Aqalka Sare oo metelayay Jubaland ayaa waxaa lagu doortay Kismaayo 29-kii July 2021. Labada xubnood ee ugu dambeeyay Aqalka Sare ayaa lagu doortay Dhuusamareeb 13-kii Nofeembar 2021, waxana ay doorashada xubnaha Aqalka Sare qaatay qiyaastii saddex bil iyo bar.

Madaama dhawaan lagu wado in ay billaabato doorashada Golaha Shacabka, faalladan kooban waxa ay si fiiro gaar leh uga hadleysaa doorshada Aqalka Sare ee dhawaan lagu qabtay shanta Dowlad-Goboleed iyo gobolka Benadir oo martigeliyay doorashadda 11-ka xubnood ee Soomaaliland ku matalaya Aqalka Sare. Faalladan waxaa lagu faaqidayaa hannaanka doorshadda, kaalinta iyo saameynta madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada, qoondada haweenka, natiijada doorshadda, iyo casharada looga baran karo doorshaooyinka golaha shacabka.

Hannaanka doorashada ee kuraasta Aqalka Sare

Doorasho qof iyo cod ah ayaa markii hore la qorsheeyay, iyadoo dadaallada arrintaas looga miradhalinayo uu hoggaaminayay Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ). Hase ahaatee, markii ay soo dhawaatay dhammaadka muddo xileedka afarta sano ee dastuuriga ah ee haya’daha dowladda federaalka sanadka 2020-ka, waxaa caddaatay in doorshooyinka tooska ah aysan suuragal aheyn. Inta badan hoggaamiyeyaasha Dowlad-Goboleedyada waxa ay doorbideen/ama taageero u muujiyeen in doorsho dadban mar kale la aado, madaama taasi ayaga ay siineyso awood ay ku saameeyaan xubnaha loo dooranayo baarlamaanka cusub.

Kulankii u dhexeeyay dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada ee Dhusamareeb ka dhacay Agoosto 2020 (iyadoo ay ka maqan yihiin madaxweynayaasha Puntland iyo Jubaland, oo ka qeybgalkooda ku xeray in marka hore Raysal Wasaare lasoo magacaabo), hoggaamiyeyaashii shirka joogay waxa ay ugu dambeyn isku raaceen in la qabto doorasho dadban, ayadoo si buuxda looga tagay dadaalkii Villa Soomaaliya ee ahaa doorasho toos ah in la aado. Heshiiskii magaaladda Muqdisho ee Sebteembar 2020 waxaa ku jiray faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida loo qabanayo

doorashooyinka Aqalka Sare iyo midda Golaha Shacabka. Heshiiska waxyaabaha kale ee uu cayimay waxaa kamid ahaa in habka doorashada ee Aqalka Sare uu lamid noqdo midkii 2016-ka.

Kadib siddeed bilood oo ismariwaa siyaasadeed iyo hubanti la'aan ah (oo ay ku jirto iskuday labo sano oo muddo kororsi ah iyo iskudhac hubeysan oo Muqdisho ka dhacay), xubnaha Golaha Wadatashiga Qaranka ayaa heshiis ku gaaray Muqdisho (ayadoo uu madaxweyne Farmaajo ka maqan yahay) May 27, 2021. Heshiiska oo la waafijiyay heshiiskii Sebteembar 17, 2020 iyo kii Febraayo 16, 2021 ee Baydhabo ku gaareen guddiga farsamada, ayaa sii caddeeyay in doorashooyinka Aqalka Sare lamid noqon doonaan hannaankii 2016.

Hannaanka doorashada ee Aqalka Sare waxa uu ka koobnaa dhowr lakab oo isa saran. Ugu horreyntii, afhayeennada baarlmaannada dowlad-goboleedyada ayaa magacaabay guddiga doorashadda ee Aqalka Sare. Marka labaad, maxadweynayaasha dowlad-goboleedyada ayaa magacaabay musharraxiinta ku tartameysa kuraasta 54-ta ah ee Aqalka Sare – Soomaaliland (11), Puntland (11), Jubaland (8), Koonfur Galbeed (8), Galmudug (8), and Hirshabelle (8). Marka saddexaad, magacyada musharraxiinta ayaa loo gudbinayay guddiga doorshada Aqalka Sare u qaabilsan baarlamaanka dowlad-goboleedka, oo jadwaleynayay islamarkaana qabanayay doorashada.

Wakiillada Soomaaliland ee Aqalka Sare ayaa lasoo magacaabay, laguna doortay hannaan gaar ah. Kadib muran daba dheeraaday oo labo dhinac oo ay kala hoogaaminayeen Cabdi Xaashi, afhayeenkii Aqalka Sare, iyo Mahdi Guuleed, Ku-xigeenka Raysal Wasaaraha Dowladda Federaalka, waxaa la isku raacay in labada siyaasi si wadajir ah u magacaabaan musharraxiinta kuraasta 11-ka ah ee Aqalka Sare. Mid walba waxa uu keensaday musharraxiintiisa, waxa ayna u gudbiyeen Raysal Wasaaraha. Si ka duwan doorashooyinka maamullada kale oo baarlamaanka dowlad-goboleedku soo agaasimay doorashada Aqalka Sare, 46 ergo (23 odayaal dhaqameed ah iyo 23 xubno bulshada rayidka ka yimid), ayaa si wadajir ah u doortay kuraasta Soomaaliland, halka Kooxda Hirgelinta Doorashada Soomaaliland ay maamulayeen hannaanka doorashada.

Maadaama ay qeyb ka ahayd shuruudihii lagu heshiisay, musharrax walba waxaa looga baahnaa inuu ka weyn yahay da'da 25 sano, islamarkaana uu bixiyo lacag aan dib loogu celineyn oo gaareysa $20,000 oo isdiiwaangelin ah (ayadoo 50% ama $10,000 qiime dhaaf ah la isku afgartay in loo sameeyo haweenka). Sikastaba, shuruudda ugu muhiimsan siyaasi walba ee doonayay in uu kamid noqdo Aqalka Sare waxa ay aheyd in uu ku qanciyo madaxweyneyaasha dowlad-goboleedyada in ay kusoo daraan liiska musharraxiinta loo gudbinayo baarlamaaka dowlad-goboleedka.

Inkastoo hannaanka doorashada ee xubnaha Aqalka Sare laga dhigay sidii hannaankii 2016 (marka laga reebo in lacagta is diiwaangelinta oo ahayd $10,000 2016 laga dhigay $20,000 2021 iyo musharraxiinta haweenka oo lacagta is diiwaangelintu ay aheyd $5,000 sanadkii 2016 laga dhigay $10,000 2021), waxaa jiray kala duwaanaansho kale. Ugu horreyn, si ka duwan doorashadii 2016-ka, qaar kamid ah Dowlad-Goboleedyada ayaa go'aansaday in kuraasta qaar ay doorashadooda qabtaan, halka kuwo kalena ay dib u dhigeen. Tusaale ahaan, Jubaland markii hore waxa ay qaabeysay doorshadda 4 kursi; Galmudug waxa ay ku bilowday doorashada 6 kursi oo Aqalka Sare ah, halka Koonfur galbeed ay agaasintay doorshadda 5 kursi. Hannaankan ah in aan la dooran dhammaan xubnaha ku matalaya dowlad-goboleedyada Aqalka Sare waxa uu keenay in jadwalkii doorashada uu dib usii dhoco. Tusaale muuqda waxaa noqon kara Jubaland oo dooratay afar kursi dhammaadkii July 20121, halka 4-ta kursi ee hartay lagu doortay Kismaayo dhammaadkii bishii Oktoobar 2021, qiyaastii saddex bilood kadib.

Marka labaad, sida guddiyadda doorashada Aqalka Sare ee baarlamanka dowlad-goboleeyda u qaabeeyeen jadwalka doorshada ma aheyn mid lamid ah hannaankii 2016-ka. 11-ka xubnood ee Puntland hal maalin ayaa la wada doortay. Guddiga Doorashada Dadban ee Soomaaliland waxa uu doorashadda Aqalka Sare ee Soomaaliland kusoo gabagabeeyay labo maalmood, halka Galmudug iyo Koonfur Galbeed ay doorashadda lix iyo shan senator ku dhameystireen hal maalin. Hirshabeelle codeyntu waxa ay dhaceysay habeennaddii, hannaanka doorashadu waxa uu ahaa mid gaabis ah. Tusaale ahaan, saddex kursi ayaa markii hore la doortay, laakiin baarlamaanka ayaa markii dambe qabanqaabiyay hal ilaa iyo labo kursi in maalintii lagu tartamo, taasoo sababtay in toddoobaadyo lagu dhammeystiro doorshadda kuraasta siddeed senator oo metelaya Hirshabeelle. Hirshabeelle waxa laga noqday codeynta iyo ku dhawaaqista natiijooyinka mid kamid ah kuraasta sababo la xiriira rabshado iyo carqaladeyn ay sababeen qaar kamid ah xidhibaannda Hirshabeelle kadib wareegga koowaad ee codeynta markii la gabagabeeyay, iyadoo natiijadii aan weli lagu dhawaaqin.

Marka Saddexaad, marka laga reebo Hirshabeelle, tartan furan lama qaban, natiijooyinka doorashada waa la iska sii ogaa. Kaliya 28 kursi (ama 52 boqolkiiba) oo 54-ta kursi ah ayaa si furan loogu tartamay. Inta badan musharraxiinta kuraasta 54-ta ah ayaa ahaa booscelis ("malxiis") kuwaasoo doorshada iskaga baxay kadib markii ay khudbadahooda jeediyeen. 26 boos celisyada ahaa oo iskaga haray dooraashada, 9 kamid ah ayaa Puntland kasoo jeeday, 8 Galmudug ah (dhammaan siddeeda senator ee Galmudug laguma tartamin), 6 kuraas oo Soomaaliland ah (ku dhawaad nus kamid ah kuraasta ayaa lagu tartamay), 2 Jubaland ah, iyo 1 Hirshabeelle ah. Tani waxa ay muujineysaa sida madaxweynayaasha dowlad-goboleedyadu ay u maroorsadeen hannaanka doorashada inta ugu badan kuraasta Aqalka Sare oo ay ka dhigeen natiijada mid horey loo go'aamiyay.

Kaalinta madaxweynayaasha dowlad-Goboleedyada ee doorashada Aqalka Sare

Awood-siinta madaxweynayaasha Dowlad-Goboleedyada inay soo magacaabaan musharraxiinta kuraasta Aqalka Sare waxay kamid ahayd caqabadaha ugu waaweyn ee naqshadda doorashada. Madaxweynayaasha Dowlad-Goboleedyada ayaa si weyn u maroorsaday doorashadii xubnaha Aqalka sare ee deegaannadooda. Waxaa la hor istaagay siyaasiyiin u qalmay in ay tartamaan. Madaxweynayaasha Dowlad-Goboleedyada ma aysan tixgelin musharraxiin badan oo caan ah oo rabay in ay u tartamaan kuraasta. Arrintan ayaa lagu macneeyay inay tahay mid ka hor imaaneysa dadaallada qaar kamid ah madaxweynayaasha Dowlad-Goboleedyada ku muujinayeen in ay ku ballaariyaan saaxada siyaasadeed ee ciriiriga ahayd, iyo mowqifka adag ee hoggaanka dowladda federaalka ah ee ku wajahan dowlad-goboleedyada tan iyo markii ay xafiiska la wareegeen sanadki 2017.

Marka lagasoo tago in meesha laga saaray musharraxiin mudnaa in ay tartamaan, marar badan, madaxweynayaashu waxa ay liiska kusoo dareen musharaxiin magac-u-yaal ah oo la tartamo kuwa ay doonayaan inay kuraasta kusoo baxaan. Waxa keliya oo loogusoo daray tartanka waxa ay ahayd in ay muujiyaan muuqaal tartan, sida aqlabiyadda ahna, tartanka way isaga baxeen kahor inta aan codbixintu billaaban. Arrimaha welwelka leh waxaa kamid ah in kuraasta qaar lagusoo daray haween musharraxiin ah si loo dhimo lacagaha diiwaangelinta maaddaama dumarka laga rabo in ay bixiyaan kala bar ($10,000) lacagta ay bixiyeen ragga musharraxiinta ah.

Doorashadii Soomaaliland, Guddoomiyihii Aqalka Sare ayaa ku jiray liiska musharraxiinta, iyadoo aan cid la tartameynin. Tani waxay ka yaabisay dad badan oo su'aal ka keenay in uu guddoomiyuhu waayay malxiis la tartama. Kahor inta aysan billaaban doorashada xubnaha Aqalka Sare ee Soomaaliland, Raysal Wasaare ku-xigeenka Xukuumadda Mahdi Guuleed ayaa muuqaal kooban (oo habeen kahor doorashada la shaaciyay) ku sheegay in ay go'aansadeen in ay diiwaangeliyaan musharrax la tartama Cabdi Xaashi. Musharraxaas ayaa is casilay kahor inta aanay codbixintu billaaban. Sidaas darteed, Cabdi Xaashi (iyo dhowr musharrax kale) qaab gacan taag ah ayaa lagu doortay.

Qaar kamid ah musharraxiinta u taagan xilka madaxtinimada ayaa si cad u cambaareeyay habka hoggaanka Dowlad-Goboleedyada ay wax isu dabamariyeen una go'aamiyeen dhammaan geeddi-socodka doorashada Aqalka Sare iyo in ay ka dhigeen doorashadii xulasho. Arrintaan ayaa loo arkayay mid tusaale xun u noqoneysa doorashada Golaha Shacabka ee soo socota.

Sikastaba ha ahaatee, Hirshabeelle way ka duwaneyd maamullada kale. Maamulkan ayaa ahaa kii ugu dambeeyay, si deg deg ah ayaana loo sameeyay inta lagu guda jiray hannaankii doorashada 2016, waxaana maamulku weli la daalaa dhacayaa dhibaatooyin ka dhashay doorashada madaxweynaha Hirshabeelle ee dabayaaqada sanadkii 2020, taasoo ku dhamaatay in Cali Guudlaawe loo doorto madaxweynaha maamulkaasi (halka Jowhar ay horey u ahayd caasimadda dowlad-goboleedka). Marka lagasoo tago arrimahaas, Madaxda Hirshabeelle ayaa go'aan ku gaaray in aysan "afduuban" howsha doorashada, waxaana ay fursad u siiyeen dhammaan siyaasiyiinta kuraasta doonaya. Si ka duwan qaabka loo dhaliilsan yahay inta badan madaxda kale ee Dowlad-Goboleedyada oo u muuqday in natiijada doorashada lasii ogaa kahor inta aan la codeyn, Madaxweynaha Hirshabeelle ayaa baarlamaanka dowlad-goboleedka u gudbiyay liiska 33 musharax oo daneynayay in ay u tartamaan 8-da kursi ee Aqalka Sare. Inkastoo si weyn loogu ammaanay dowlad goboleedka inuu furay masraxa siyaasadda, haddana doorashada Hirshabeelle waxa ay ahayd midda lacagaha ugu badan codadka lagu iibsaday marka loo eego dowlad-goboleedyada kale. Tani waxay qeyb ahaan ka dhalatay inay ahayd tartan furan.

Ilaalinta qoondada haweenka

Natiijooyinka wanaagsan ee kasoo baxay doorashada Aqalka Sare waxaa kamid ahaa metelaadda haweenka. 14 (ama 26 boqolkiiba) oo kamid ah 54-ta kursi ee Aqalka Sare waxaa loo doortay haween. 14-ka haween ee la doortay, saddex kamid ah waxaa lagu doortay Puntland, saddex waxaa doortay ergada Soomaaliland, 2 waxaa lagu doortay Koonfur Galbeed, 2 Jubaland, 2 Hirshabeelle, iyo 2 kalena Galmudug.

Heshiiska ayaa ahaa in haweenku ay 30% ku yeeshaan guud ahaan labada aqal ee baarlamaanka. Raysal Wasaaraha, madaxweynayaasha Dowlad-Goboleedyada, guddiyada doorashada, beesha caalamka, iyo bulshada rayidka ah ayaa dhammaantood door ka qaatay in qoondada haweenka la xaqiijiyo. Raysal Wasaaruhu wuxuu magacaabay guddi u dooda qoondada haweenka oo ka kooban 13 xubnood, kuwaasoo u ololeynaya kana shaqeynaya ilaalinta qoondada haweenka ee 30% ee doorashada baarlamaanka. U qareemidda iyo dadaallada ay sameeyeen qaar kamid ah ururrada bulshada rayidka ah oo ay wehliyaan beesha caalamka ayaa qeyb ka ahaa sidii loo ilaalin lahaa qoondada haweenka ee Aqalka Sare ee Dowlad-Goboleed kasta.

Joogteynta 24% oo ay haweenku ku lahaayeen baarlamaanka 10-aad ee labada aqal ama la gaarsiiyo 30% waxay u baahan doontaa dadaal badan inta lagu guda jiro doorashada Golaha Shacabka. Inkastoo natiijada doorashada Aqalka Sare ay muujineyso suurtagelinta arrintan, haddana haweenka tartamay ayaa sidoo kale la kulmay caqabado intii lagu jiray doorashooyinkan. Tusaale ahaan, Hirshabeelle, mid kamid ah labada Senatar ee haweenka ah ee la doortay ayaa markii hore waxaa la tartamayay rag, taasoo keentay in doorashada kursigaas dib loo dhigo. Wadatashi kadib, raggii tartamayay waxaa lagu qanciyay inay ka haraan tartanka (iyagoo sida ay inoo sheegeen ilo-wareedyo lacagihii diiwaangelinta dib loogu celiyay). Sidoo kale, Soomaaliland hal kursi waxa ku tartamay nin iyo haweeney. Ninkii ayaa ugu dambeyn isaga haray tartanka. Jubaland ayaa labadii kursi ee senate-ka ee ay ku guulaysteen haweenka Aqalka Sare waxay kamid ahaayeen afartii kursi ee ugu dambeeyay ee lagu doortay Kismaayo. Markii hore waxaa soo baxayay ififaalo muujinaya in hal qof oo dumar ah keliya kasoo bixi doonto doorashada Aqalka Sare ee magaalada Kismaayo, balse ugu dambeyntii labo kursi ayaa si gaar ah loogu qoondeeyay haweenka oo ay ku tartameen haween keliya.

Natiijada doorashada iyo wax yaabihii ugu muhiimsanaaa ee go'aamiyay

Doorashada Aqalka Sare ma aysaan ahayn mid lagu tartamay waxaana jiray arrimo badan oo go'aamiyay natiijada doorashada.

Ugu horreyn, habka dooraashaa loo dajiyay ayaa u sahashay madaxweynayaasha mamul goboleedyada in ay saameyn weyn ku yeeshaan cidda ku tartamaysay oo ku guulaysatay kuraasta. Habka loo dajiyay doorashada ayaa awood u siisay madaxweynayaasha maamul goboleedyada in ay u gudbiyaan liiska siyaasiyiinta u tartamaya kursi kasta guddiga baarlamaanka ee maamulaya doorashooyinka Aqalka Sare. Sida wanaagsan waxay ahayd in madaxweynayaashu ay qabtaan oo ay soo gudbiyaan magacyada dhammaan musharraxiinta ku tartamaya kursi kasta iyadoo la ilaalinayo qoondada haweenka. Waxaa

dhacday in Hirshabeelle marka laga reebo madaxweynayaasha maamul goboleedyadu ay diideen in liiskaas lagu daro siyaasiyiin diyaar u ah oo u qalma in ay u tartamaan. Inkastoo geeddi-socodku uu la mid ahaa kii 2016-kii, haddana jawiga siyaasadeed ee markaas wuxuu ahaa mid xasiloon marka loo eego kan 2021-ka.

Midda labaad, qofka siyaasad ahaan meesha uu ka tirsan yahay ayaa ahayd qodob go'aamiyay cidda liiska lagu darayo iyo natiijada doorashada Aqalka Sare. Maamulka Koonfur Galbeed, waxaa liiska laga saaray siyaasiyiin caan ah oo ka tirsan xisbiyada kumeelgaarka ah ee mucaaradka. Taa beddelkeeda, dhallinyaro iyo siyaasiyiin aan aad loo garaneynin ayaa tartamay loona doortay xubinnimada Aqalka Sare. Madaxweynaha Koonfur Galbeed ayaa la rumeysan yahay inuu u dhow yahay Madaxweyne Farmaajo, arrinkan waxa uu muhiim u ahaa go'aaminta cidda guuleysatay. Jubaland, siyaasiyiinta laga yaabo inay ku dhow yihiin Villa Soomaaliya ma helin fursad loogu daro liiska marka loo eego xiriirka aan wanaagsaneyn ee ka dhexeeyay dowladda federaalka iyo Jubaland dhowrkii sano ee la soo dhaafay. Dhanka doorashada Soomaaliland, liiska musharixiinta iyo natiijada kasoo baxday waxaa wadaagay labada garab ee ay kala hogaaminayeen Guddoomiyahii Aqalka Sare Cabdi Xaashi iyo Raysal Wasaare kuxigeenka Mahdi Guuleed. Dhanka Galmudug, waxaa gacanta sare ku lahaa saaxiibbada hoose ee madaxweynaha (ee loo yaqaan Waayo Arag). Sidoo kale, Madaxweynaha Puntland wuxuu soo xushay saaxiibo dhow oo ay ku jiraan mas'uuliyiin ka tirsan dowladda iyo kuwo u codeyn kara haddii, sida ay dad badan rumeysan yihiin, uu go'aansado inuu u tartamo doorashada madaxweynaha federaalka.

Midda saddexaad, Hirshabeelle, saaxaddu way furneyd, waxaana la diiwaangeliyay musharaxiin badan oo u tartamaya 8-da kursi ee Aqalka Sare ee lagu doortay Jowhar. Sikastaba ha ahaatee, qodobka ugu muhiimsan ee natiijada doorashadu waxay ahayd awood dhaqaale. Xildhibaannada dowlad-goboleedyada ayaa sameystay guddiyo iyo dad metela oo ay kula tacaamulayeen musharraxiinta, waxayna dalbadeen lacago ay ku bedelanayaan codadka. Sidoo kale waxaa goobta doorashada ku sugnaa wakiilo ka socday qaar kamid ah musharraxiinta u tartameysa xilka madaxweynaha oo bixinayay lacag elaktroonig ah oo ay ku badalanayeen codadka inta lagu guda jiro wareega labaad ee doorashada. Lacag ayaa sidoo kale waxaa isticmaalayay ganacsato, waxaana dadkii ugu lacag bixinta badnaa ay ku guuleysteen kuraas.

Casharrada looga faa'iideysan karo doorashada Golaha Shacabka

Maadaama Soomaaliya ay isku diyaarineyso doorashada xubnaha Golaha Shacabka, waxaa casharro badan laga baran karaa doorashada Aqalka Sare, si looga fogaado qaladaadkii dhacay oo kale.

Marka koowaad, inkastoo xubnaha Aqalka Sare sida fahamku yahay ay danaha dowlad-goboleedyada ku metelaan baarlamaanka federaalka (inkasta madaxweynayaasha maamul goboleedyadu ay is metelayeen inta badan afartii sano ee la soo dhaafay), waxaa lagu doodi kara in saameynta ay madaxweynayaasha dowlad-goboleedyadu ku lahaayeen natiijada xubnaha Aqalka Sare ay ka dhigan tahay inay helaan siyaasiyiin taageeeta danahooda kuna metela baarlamaanka federaalka.

Sikastaba ha ahaatee, Golaha Shacabka waxa uu aragti ahaan metelaa shacabka inkastoo inta badan lagusoo xusho ama lagusoo doorto doorasho dadban. Sidaas darteed, waa in la xakameeyaa doorka iyo saameynta madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada ee doorashada Golaha Shacabka. Shuruudda ah in madaxweynayaasha maamul goboleedku ay soo gudbiyaan liiska musharraxiinta ayaa ahayd caqabadda ugu weyn waxayna ka dhigtay doorashada Aqalka Sare mid xulasho ah ee aan ahayn doorasho furan oo la tartamo. Haddaba, si sare loogu qaado loollanka Golaha Shacabka, waa in la yareeyaa shuruudaha musharraxiinta iyo ergada, lagana dhigaa mid ka madax bannaan saameynta dowlad-goboleedyada iyadoo loo marayo hababka soo socda:

- Dowlad-goboleedyadu waa in aan la siin awood ay ku doortaan labada wakiil ee bulshada rayidka ah kursi kasta oo kamid ah shanta xubnood ee Guddiyada Xulista Ergada. Door kormeer ayaa ku filan dowlad-goboleedyada.
- Waa in odayaasha beelaha iyo Guddiyada Xulista Ergada loo madax-banneeyo soo xulista 101-ka ergo ee dooranaya kursi kasta oo Golaha Shacabka ah. Haddii hoggaanka dowlad-goboleedka la siiyo door mug leh ee hanaanka dooraashada, natiijadu waxay la mid noqon doontaa hanaankii Aqalka Sare ee khaldanaa.
- Shuruudda warqadda amniga oo ay wehliso khidmad ay bixiniyaan musharraxiinta ($750) iyo ergada wax dooranaysa ($30) waa in dib loo eego oo la fududeeyo. Shuruuda noocaan ah waxaa loo isticmaali karaa in laga saaro musharaxiinta qaarkood tartanka. Intaa waxaa dheer, in ergada lagu xiro inay bixiyaan khidmadaha warqada amniga si ay u codeeyaan waxay hubaal ahaan dhiirigelin doontaa musuqmaasuq.

Marka labaad, waa in la sameeyaa habab lagula socdo, lagulana dagaallamayo musuqmaasuqa iyo is dhaafsiga furaan ee lacagta xilliga doorashada. Tusaale ahaan, Hirshabeelle, isdhaafsiga lacagaha ayaa loo sameynayay si furan. Iyadoo aan loo eegin khaladaadka doorashada, habab lagula dagaallamo musuqmaasuqa iyo laaluushka waa in ay jiraan kahor iyo inta lagu guda jiro doorashada Golaha Shacabka. Doorashada Golaha Shacabka ayaa la filayaa in ay noqoto mid aad u adag oo u nugul is dhaafsiga lacagaha, marka loo eego doorashada Aqalka Sare. Masuuliyiinta ka socota guddiga doorashada heer federaal iyo heer dowlad goboleed iyo sidoo kale goobjoogayaasha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah iyo warbaahinta waa in ay dejiyaan habab adag oo lagula dagaallamayo musuqmaasuqa, lana dhaqan geliyo sharciga la dagaallanka musuqmaasuqa.

***Tixanaha Doorashada**: Faalladan waa middii saddex iyo tobanaad ee tixanaha. Somali Public Agenda waxa ay soo dhaweyneysaa talooyinka iyo fikradaha la xiriira doorashooyinka socda iyo kuwa la filayo in ay ka dhacaan Soomaaliya heer federaal iyo heer dowlad-goboleed.*